

Taageerada Barashada Luuqada ee Caruurta Yaryar markay Gurigga joogaan Talooyin kusocda waalidinta iyo qoysaska

Ardayda sida xirfada leh wax uqora una akhriya ee dhigta fasalka sadexaad ayaa afar jibaar ugu dhaw inay dugsiga kaqalin jabiyaan. Waa taas sababta yoolka labaad ee Higsiga Denver ee 2020 - oo aasaasi u ah guusha dugsiga - uu aad muhiim u yahay. DPS waxay diirada saaraysaa aqoonta caruurta da'da yar taasoo aasaas u ah khibrada aqooneed ee ardayda. Aqoonta caruurta aadka u yaryar, taasoo DPS kuqeeexo akhriska, qorista, kuhadalka iyo dhagaysiga, waxay muhiim u tahay dhismaha aasaaska waxbarashada iyo nololaha caruurta.

Waxaa jira hawlo badan oo waalidinta iyo qoysasku ay kudadaali karaan marka ardaydoodu gurigga joogaan si looga taageero aqoonta caruurnimada ay waxkubartaan.

La akhri buugta, kuwa dhagaysiga ah iyo qoraalada internetka.

Qayb aad muhiim u ah in cunugu ujeclaaado akhriska ayaa ah in lalawadaago sheekooyinka iyo macluumaadka xiisaha leh oo qoraal ah. Booqo dpsk12.lib.overdrive.com adoo adeegsanaaya aalad kasta oo internet wireless ah leh si aad ugu gasho ID-ga ardayga iyo taariikhdiisa dhalashada. Ama booqo bogga lion.dpsk12.org kaasoo aad kahelayso adeegyo aad ubalaaran oo casri ah, ayna kujiraan buugta caruurta, oo ah buug kale oo online ah oo wanaagsan. Cunug kasta oo dhigta DPS wuxuu heli karaa bugaagta onlineka ah oo farabadan kuwaasoo ay helikaraan markay rabaan, meelkasta oo ay joogaan.

Talooyin ku aadan sida Wax loola Akhriyo Cunugaaga Yar

1. Ufasax in cunugu doorto buuga aad la akhrinayso.
2. Kula moogayso/tookayso akhrinta cunuga kuna dhiiri gali inuu kor kuula akhriyo buugga.
3. Intaad akhrinaysaan, waydii cunugaaga suaalo sida "maxaad isleedahay way dhacaayaan marka xiga?" ama "Maxay kulatahay sababta ay arintaas udhacday?"
4. Wax kula akhri cunugaaga luuqadiisa hooyo.

Iska qor Barnaamijka Aqriska iyo qorista Xiliga xagaaga ee Maktabada Guud ee Denver Public.

Waa qaab kale oo wanaagsan oo aad caruurtaada kujeclaysiin karto wax akhriska, barnaamijkaan bilaashka ah waxaa kamid ah munaasabadaha xiisaha leh iyo in cunugu awood u yeesho inuu bilado kuqaato akhriska - xataa tigidh uu kugalo beerta madadaalada ee Elitch Gardens! Ka akhri macluumaad dheeri ah bogga SummerOfReading.org.

Kafaaiidayso fursadaha kobcinta aqoonta ee xiliga xagaaga.

Qaar badan oo kamid ah dugsiyadeena ayaa bixiya fursado bilaash ah inta lagu jiro xagaaga si ardaydu uga shaqeeyaan xirfadahooda aqooneed. Kawarayso macalinka cunugaaga si aad wax badan uga ogaato taageerada laheli karo si cunugaaga looga caawiyo gaarista yoolalkiisa aqooneed.

"Cunugaygu wuxuu rabaa in isla buug akhristo marar badan."

"Cunugaygu wuxuu kaliga akhristaa isla buug iskumid ah."

Ayadoo ay fiicantahay in aad cunugaaga kacaawiso balaarinta aqoontiisa asagoo akhriya buug cusub helaayana sheekooyin cusub oo uu xiiseeyo, hadana cilmi baaris ayaa muujinaysa tirooyin cajiib ah oo kahadlaaya faaiidooyinka kucelcelinta akhriska hal buug iyo sidoo kale xiisaha joogtada ah caruurta kuqabaan akhrinta buugaagta taxanaha ah. Hadii cunugaagu jecelyahay inuu akhriyo buug kabaxsan kuwa dugsiga, aadna dhib u arkin mawduuca sheekada uu akhriyaayo, waxaa la xaqiijiyay inuu wax baranaayo hormarna samaynaayo xataa hadii qoraalka/sheekooyinka taxanaha ahi iskumid yihiin. Si taas lamid ah, hadii ardaygaagu jecelyahay akhrinta mawduuc gaar ah, cilmi baaris ayaa muujinaysa akhrinta buugaag kaladuwan oo hal mawduuc kahadlaaya inay tahay mid kamid ah qaababka ugu dhakhsaha badan ee cunugu kudhiso aqoontiisa iyo erayadiisa cusub. Waxaad kacaawin kartaa cunugaaga raadinta buugta, ayna kujiraan buugaagta dhagaysiga ah, kuwaasoo uu jecelyahay adinkoo kabaaraaya buugaagta faraha badan ee laga helo DPS xili kasta, meelkasta.

Alaabta Akhrista ee Lion: <http://lion.dpsk12.org>

Alaabta Akhrista ee OverDrive: <http://dpsk12.lib.overdrive.com>